

# Direct Support Professional (Shaqaalaha Daryeelka Dadka)

## Waxaad Ka Fekertaa Shaqo ah Daryeelid oo leh Mustaqbal

*Ku raaxeyso shaqo ah daryeelka  
caafimaadka oo ah mid wax weyn  
ka beddeleysa noloshada dadka*



Direct Support Professionals (Shaqaalaha Daryeelka Dadka ama DSPs) waxay caawiyaan dadka naafada ah. Shaqada DSP waa mid aan ku koobneyn daryeelka oo keliya ee waa taakuleynta dadka naafada ah si ay si buuxda qeyb noqdaan bulshada iyo si ay iyagu wax u kala dooran karaan. Shaqaalaha DSP waxay ka shaqeeyaan waa deegaankooda iyo goobo ku yaalla xaafadaha, oo dadka loo shaqeeyo waa keligood, ama waxaa la nool saaxiib ama qoys ama dadka naafo ah. Shaqadan waa mid kugu haddii aad qiimeyso in aad dadka ku taageerto si ay u maareeyaan noloshooda iyo si ay ugu taakuleyso in ay gaaraan hadafka noloshooda.

**SHAQOYINKA KALE EE LA MIDKA AH DARYEELKA IYO CAAWINA:** Daryeela, Kaaliyaha Caafimaadka Guriga, Khabiirka Taageerada Guriga, Takhasuslaha Xirfadaha Noloshada ee Madaxabannaan, Kaaliyaha Daryeelka Shakhsiyeed, Caawiyaha Daryeelka Gaarka, Daryeelaha Tooska, iyo in kuwa kale oo badan.



**Hadda waxaa jirta baahi weyn oo ah Direct Support Professional (Shaqaalaha Daryeelka Dadka).** Taas macnaheedu waa in ay hadda goobaha shaqada shaqaale raadinayaan. Waxaa la filayaa in ay baahida badan ee Direct Support Professional (Shaqaalaha Daryeelka Dadka) sii badan doonto tobanka sano ee soo socda.

### WAXBARASHO

Shahaadada dugsi sare ama tan dadka waaweyn ayaa caadi ahaan la iska raba si uu qof u noqdo Direct Support Professional (Shaqaalaha Daryeelka Dadka), hase ahaatee qof kasta oo gaaray 16 jir ayaa xaq u leh in uu noqdo DSP iyada oo laga xadeynayo masuuliyadda. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada. Intaas waxaa dheer, shaqaalaha DSP waa in ay soo qaataan tababar uu ku khasbayo sharciya gobolka inta aysan bilaabin shaqada, iyo sidoo kale markaas dib sannad kasta.

### LEYSANKA SHAQADA

Ma jiraan wax leysan daryeela ah oo la isaga baahan yahay. Shaqooyinka qaarkood ayaa la iska rabi karaa leysanka darawalnimada. Goobta shaqada weydii leysanka ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

### AQOONSIGA SHAQADA

Goobaha shaqada badankoodu kaama rabaan aqoonsi waxbarasho. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

### BAARITAANKA SHAQAALAHA

Shaqaalaha DSP waa in la soo baarto taariikhda oo dhan sida uu dhigayo sharciga gobolka.

### AQOONTA LUUQADAH

Dadka hadda barta afka Ingiriiska ee ku hadla luuqado kale oo aan ahayn afka Ingiriiska waa ay noqon karaan DSP. Inta lagu jiro wareysiga shaqada, goobta shaqada weydii waxa ay rabaan iyo haddii ay u baahan yihiin luuqad aad ku hadli karto markaad shaqeyneyso.

### SHAQOYIN KALE

Shaqaalaha DSP waxay yeeshaan khibradaha sida loola shaqeeyo dadka naafada ah oo waxay baran karaan xirfad ah kalkaaliye caafimaad iyo xirfado kale oo ah daryeelka caafimaadka, adeegaha bulshada, waxbarashada gaarka ah ama shaqooyin kale oo la mid ah. Waxa kale oo jira fursado shaqo oo ah daryeelka tooska ah, sida xil ah horjoogaha iyo maamulaha, ka dib marka aad yeelato khibrad badan oo ah shaqada DSP.

# Direct Support Professional (Shaqaalaha Daryeelka Dadka)

## MUSHAARKA

Mushaarka la siiyo DSP wuxuu ku xiran yahay goobta shaqada, meesha iyo wakhtiga shaqada la qabanayo iyo adeegyada la qabanayo. Sannadkii 2022 celceliska lacagta saacaddii lagu shaqeynaayey meelaha xarumaha ah, oo caadi ahaan la yiraahdo guryaha kooxda, waxay ahayd \$14.93 ilaa \$20.15. Celceliska lacagta saacaddii ee shaqada maalintii la soo qabto waxay ahayd \$14.57 ilaa \$17.30. Xarumaha daryeelka heerka dhexe, oo ah kuwa inta badan loogu talagalay dadka ay adag yihiin baahidooda caafimaadka, ayaa celceliska ugu lacag badan oo waa \$15.60 ilaa \$26.44 saacaddii.

## HAWLAHA SHAQADA MAALINTII

Maalin kasta waxaa kala duwan xilka shaqaalaha DSP sababtoo ah baahida dadka u baahan DSP ayaa ku kala duwan qof ilaa qof.

- In qof lagu caawiyo meesha uu ku nool yahay, haddii ay ahaan lahayd guri dad badan (guryaha kooxaha ama qoys ilmo loogu geeyey korin sharci ah), guriga qofka ama xarun daryeel.
- In qof lagu caawiyo qubeyska, isticmaalidda musqusha, xirashada dharka, shanleysiga iyo hawlaha kale ee maalintii.
- In qofka lagala hadlo shakhsi ahaan wax kasta oo u fiican iyo waxa kasta oo aan u fiicneyn.

*Daawo fiidiyow ku baxaya afka Ingiriiska oo ku saabsan waxa ay sameeyaan Direct Support Professionals (Shaqaalaha Daryeelka Dadka).*



- In qofka baabuur lagu geeyo ballamaha, in uu la kulmo asxaabta iyo qoyska, iyo goobaha ay isugu yimaadaan dadweynaha.
- In laga fekaro sida dadka naafada ah loogu caawin karo si ay iyagu ilaa xoogaa isugu filnaadaan.
- In dadka lagu daryeel oo lagu taageero hawlaha nolol-maalmeedka ah oo sida qaadashada daawada, dhaqdhaqaaqa, karinta iyo cunista cuntada, nadiifinta guriga, adeegga dukaamada.
- In qofka lagala shaqeeyo sida uu ugu qareemi karo xuquuqdiisa iyo adeegyada helitaanka tasiilaadka iyo fursadaha bulshada dhexdeeda.
- In qofka lagala shaqeeyo in ay goobtiisa shaqada u hagaajiyaan habka shaqada.
- In qofka lagu loo taageero shucuur ahaan iyo in lagula saaxiibo hawsha loo qabanayo.
- In qofka lagu caawiyo sameysashada iyo xiriirinta saaxiibbada uu la hadli karo.
- In la qoro macluumaadka la rabo iyada oo la raacayo qalabka iyo habka ay goobta shaqadu rabti.
- In la barto waxa muhiimka u ah qofka loo adeegayo ka dibna loou caawi sida ugu fiican ee uu qofku ku gaari yoolalkiisa.

## SIDA LAGU RAADSADO SHAQADA DIRECT SUPPORT PROFESSIONAL (SHAQAALAH DARYEELKA DADKA)

- Kala hadal shaqaalaha xafiiska CareerForce ee goobta kuugu dhow:
  - Booqo [CareerForceMN.com/locations](https://www.careerforcemn.com/locations)
  - Soo garaac 651-259-7500
- Toos ula xiriir goobaha shaqada:
  - Shaqooyin ka baaro liiska [CareerForceMN.com/job-search](https://www.careerforcemn.com/job-search)
  - Booqo [DirectSupportConnect.com](https://www.directsupportconnect.com)



**CareerForceMN.com/CaringCareer**

651-259-7500 – Turjubaan ayaa loo diyaarinayaa qofkii naga soo socda.